TIPS FOR PARENTS

Special Education



Waxbarashada Gaarka ah

Arday walba waxaa soo mara wakhtiyo ay ku adkaato waxbarashada ama nolol dugsiyeedka. Hase ahaate, waxaa jira arday u baahan taageero dheeraad ah in ay ka helaan Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah Special Education).

Waalidka ayaa noqon kara qofka ugu horreeya ee ogaada in ilmahooda dhibaato ka haysato waxbarashada, ama macallin ayaa u sheega waalidka in ilmahoodu u baahan yahay taageero badan oo oo joogta ah.

Waxyaabo in la xusuusto ay tahay

- Arrimaha qaarkood macallinka ayaa ku xallin kara fasalka, markaa horta la hadal macallinka haddii aad ka werwersantahay ilmahaaga horumarkiisa.
- Waxbarashada Gaarka ah wax xun ma'aha — arrayda qaar ayaa si ka duwan wax u barata ama u baahda caawimo dheeraad ah si ay u guulaystaan.
- Haddii uu ilmahaagu ku hadlin luqadda Ingiriiska, micnaheedu ma'aha in uu u baahan yahay Waxbarasho Gaar ah. Dhibaatooyinka qaar ayaa ka yimaadda la-qabsashada caadiga ah ee luqadda iyo dugsiga cusub. Waxaa wax tar u lahaan karta haddii la siiyo maamulaha dugsiga macluumaad ku saabsan ardayga waxbarashadiisii hore ee uu ku soo dhigtay luqadiisa.
- Qaybo ka mid ah habka loo raadsado Waxbarashada Gaarka ah ayaa magacyo badan leh oo lagu wareeri karaa. Mar kastaba wixii aad fahmi weydid, su'aalo ka weydii.
- Waalidku door muhiim ah ayay ka qaataan Waxbarashada Gaarka ah. Way habbon tahay in aad ilmahaaga caawimo la doontid.

Waa maxay Waxbarashada Gaarka ah (Special Education)?

Waxbarashad Gaarka ah waa erey loo isticmaalo in lagu qeexo barnaamijyada iyo hababka lagu taageero ardayda u baahan in si ka duwan sida caadiga ah wax loo baro ama u baahan qalab gaar ah si ay waxbarashada ugu guuleystaan.

Mararka qaarkood Waxbarashada Gaarka ah waxaa ka mid ah hab kale oo wax loo dhigo, marmarna ardayga ayaa la siiyaa wakhti dheeraad ah oo uu ku qoro imtixaanada ama waxaa la siiyaa qalab gaar ah oo ka caawiya waxbarashada.

Waxa ugu muhiimsan in aad ogaatid in Waxbarashada Gaarka ah loola jeedo in ilmahaaga lagu caawiyo sidii uu waxbarashada ugu guulaysan lahaa.

Wixii aad samayn lahayd haddii aad u malaysid in ilmahaagu u baahan yahay Waxbarasho Gaarka ah?

Su'aalo weydii

- Weydii ilmahaaga haddii ay jiraan waxyaabo gaar ah oo markasta ka dhiba waxbarashada.
- Weydii macallinka haddii uu u malaynayo in ilmahaagu u baahan yahay caawimo dheeraad ah iyo haddii macallinku siin karo caawinadaas dheeraadka ah.
- Xaaladaha qaarkood ayaa laga yaabaa in ay saameeyaan waxbarashada (sida maqalka, aragga, iwm), markaa la hadal ilmahaaga dhakhtarkiisa.

La kulan shaqaalaha dugsiga

- Haddii aad u malaynaysid in ilmahaagu u baahan yahay caawimo, weydiiso maamulaha ama maamule ku-xigeenka in aad la shirtaan shaqaalaha kale ee dugsiga (shirkaas oo loo yaqaano *School Team Meeting*) si looga hadlo ilmahaaga.
- Isu diyaari shirka. Marmar ayay waxtar leedahay in la qorto su'aalaha, sida
  - Barnaamijyo iyo taageero noocee ah ayaa ilmahayga wax tari kara?
  - Maxaa laga helaa dugsiga?
  - Ilmahaygu ma inuu sugaa baa muddo dheer si uu barnaamijka u qalma galo?
- Shirka Kooxda Dugsiga (*School Team Meeting*), shaqaalaha dugsigu waxay soo jeedin karaan ha lama laba siyaabood:
  - in macallinku sii wado caawimada fasalka gudahiisa;
  - in macallinku sameeyo Qorsho Waxbarasho (Individual Education Plan) ama IEP (micnaha hoos buu ku yaala).
  - In ardayga si toos ah loo "qiimeeyo" si loo ogaado in uu leeyahay baahiyo gaar ah; **iyo/ama**
  - in dugsigu shiriyo guddi gaar ah oo ku saabsan Waxbarashada Gaarka ah, oo loo yaqaano Identification Placement and Review Committee (IPRC).

Waa maxay qiimaynta Waxbarashada Gaarka ah?

Waxbarashada Gaarka ah waa "qiimeyn" uu sameeyo got takhasus u leh, laguna ogaado in ardaygu leeyahay

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Copies are available in several languages at *www.peopleforeducation.com.*
For more information, call 416-534-0100 or email: *info@peopleforeducation.com*
© People for Education 2009
THE ONTARIO TRILLIUM FOUNDATION
LA FONDATION TRILLIUM DE L'ONTARIO
toronto community foundation



Special Education

baahiyo gaar ah iyo waxa ay yihiin baahiyahaasi. Maamulahaaga ama Maamule kuxigeenka ayaa kuu micneyn kara waxa aad u baahan tahay si ilmahaaga loo qiimeeyo, waxaana laga yaabaa in aad muddo sugtid qiimeynta.

Waa maxay IEP?

Qorshaha Waxbarashada ama (IEP), wuxuu qeexayaa waxa dugsigu u qaban doono ilmahaaga. ***Ardayga isagoon la qiimeeyn ayuu ka qayb qaadan karaa Qorshaha Waxbarashada IEP.***

Qorshaha Waxbarashada (IEP) waxaa ka mid ah:

- Liis taxaya ardaygu waxa uu ku fiican yahay iyo waxa uu ku liito (u baahanyahay);
- Qoraal kooban oo ka hadlaya adeegyada waxbarashada gaarka ah ee ardaygu heli doono; meesha, wakhtiga iyo cidda adeegaas siin doonta.
- Sharax ku saabsan sida ardayga horumarkiisa loo qiyaasi doono, loonana socon doono.
- Himilooyinka ardayga iyo macallinku ay doonayaan inay sannadkaas,gaadhaan; iyo
- Liis taxaya qalab gaar ah oo la siiyo ardayga.

Qorshaha Waxbarashada (IEP) waa in lagu dhammeeyaa 30 beri oo dugsiga la dhigto gudahood ka dib ilmahaaga marka lagu qoro barnaamijka gaarka ah. Maamuluhuna waa in uu hubiyaa in lagu siiyay koobi.

Waa maxay IPRC?

Mararka qaarkood ayaa Guddiga Dugsigu soo jeediyaa in ay kulmaan guddi loo yaqaano IPRC oo ka shirta sidii wax loogu qaban karo ilmaha waxbarashada sidii uu ugu guulaysan lahaa (loona yaqaano "special needs" ama waxbarashada gaarka ah).

Kulankan IPRC waxaa codsan kara waalidiinta ama dugsiga. Marka waalidku qoraal ku codsadaan, ayaa la qabtaa shirka. Dugsigu waa in uu ogaysiiyaa waalidka shirkan, **aad bayna u tahay in waalidku ka soo qayb galo.** Shirka waxaa si rasmi ah loogu go'aamin doonaa:

- Haddii uu ardaygu leeyahay baahiyo waxbarasho oo gaar ah,
- Baahiyaha waxbarasho ee ardayga, iyo
- Barnaamijka ugu habbon ardayga.

Maxaa ka dhaca shirka IPRC, waana maxay doorka waalidka?

Shirka IPRC waxaa badanaaba ka soo qayb gala ardayga macallinkiisa iyo/ama Lataliyaha Gaarka ah, Maamulaha, takhtarka cilmi nafsiga,,wakiil ka socda guddoonka waxbarashada iyo waalidka.

Iyagoo isticmaalaya maclumaad ay ka heleen shaqaalaha dugsiga iyo waalidka, ayay guddigu u soo jeediyaan ardayga, waalidkana waxaa laga codsadaa in ay saxeexaan in ay ku raacsan yihiin talooyinka guddiga. Guriga ayaad u qaadan kartaa waraaqda si aad uga soo fakartid in aad saxeexdo.

War-galin ku saabsan IPRC:

- Waxaad shirka u soo kaxaysan kartaa qof qoyskaaga ka mid ah ama saaxiib yaqaana ilmaha.
- Soo qaado waraaqo dhakhtar ama qiimeyn ku saabsan xaaladda caafimaad ama xirfadaha waxbarasho ee ilmaha.
- Sii qaad sawir ilmahaaga ah si ay guddigu u xusuustaan qofka ay ka hadlayaan.
- Haddii barnaamij gaar ah laguu soo jeediyo, codso in aad soo aragtid.
- Haddii aad ku qanacsaneen go'aanka guddiga IPRC, waad ka doodi kartaa. Maamulaha dugsiga ayaa kuu sheegi kara habka aad uga doodi lahayd.
- Habka IPRC wuxuu u muuqdaa wax rasmi ah laakiin micnaheedu waa in adiga iyo ilmahaagu aad codsan kartaan taageero joogta ah, oo ka caawin karta in uu ku guulaysto dugsiga.

Ilmahayga taageerada uu helo miyay isbeddeli doontaa muddo ka dib?

- Ilmahaaga barnaamijkiisa waxaa dib looga fiirsan doonaa sannad-dugsiyeedkiiba mar – markaas ayaad weydiisan karta in wax la beddelo ama macluumaad dheeraad ah in aad heshid.

Xaggee bay waalidiintu caawimo u raadsan karaan?

- Weydiiso macallinka, maamulaha ama Lataliya Gaarka ah in ay ku siiyaan maclumaad dheeraad ah.
- Waxbarashada Dadka (People for Education) ayaa laga helayaa macluumaad badan oo la xiriira waxbarashada gaarka ah. Fiiri Shabaqadda Intarnetka ee *http://www.peopleforeducation.com/links/special_needs* .
- Haddii aad la xiriirti Shaqaalaha Adeegyada Dejinta ee dugsiga jooga, waxay ku micnayn karaan sida habka Waxbarashada Gaarka ah (Special Education) ay u shaqayso.
- Waalidiinta kale wax baad ka ogaan kartaa – kala hadal sida habka Waxbarasha Gaarka (Special Education) u shaqayso.

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

People for Education is an independent parents' group working to support public education in Ontario's English, French and Catholic schools.

You can reach us at: P.O. Box 64, Station P, Toronto, Ontario, M5S 2S6
Phone: 416-534-0100 • fax: 416-536-0100 • email: *info@peopleforeducation.com* or *visit: www.peopleforeducation.com*